

# Qorshee sida aad ku baxsan lahayd hadii uu dab dhaco

Haddii uu dab ka kaco gurigaaga, markaas kabacdi inaad qorsheeyso sidaad ku baxsan lahayd mid aad ka gaartid maaha.  
Raac tillaabooyinkan si aad u qorsheysato sida aad uga bixi lahayd goobta



## Tallaabada koowaad

Waraq ku sawiro qaab dhismeedka gurigaaga.  
Isku day inaad sawirto laba siyaabood oo aad uga bixi karto qol kasta.



## Tallaabada labaad

Dhig qorshaha meel uu qof walba arki karo.  
Sida talaajadda.




## Tallaabada seddexaad

Dooro meel guriga banaankiisa ah oo ammaan ah isla markaasna lagu wada kulmi karo.  
Meehaas waa meesha ay qoyskaagu ku kulmi doonaan haddii uu dab dhaco.



## Tallaabada afaraad

Tababar ku samee qorshahaaga.  
Tababarka aad ku sameynayso ha noqdo mid xaalado kala duwan ah sida habeenkii iyadoo nalalku dansan yihiin.  
Xusuusnow inaad gurguurato si aad uga fogaato qiiqa.



## Tallaabada shanaad

Hubi in qalabka qiiqa sheega (smoke alarms) ee gurigaaga ku xiran ay shaqaynayaan.  
Nadiif ha ahaadaan oo ka ilaali boodhka iyo cayayaanka.